Su'aalaha Baaritaanka Inta Badan La Isweydiiyo ee Ku saabsan Taariikh Dembiyeedka ee ka socda SI-yada

WAA MAXAY QOFKA AY WAX KHUSEEYAAN 'SUBJECT INDIVIDUAL' AMA SI?

Qofka ay wax khuseeyaan (SI) waa qof lagu qeexay Xeerarka Oregon iyo xeerarka Maamulka Oregon oo looga baahan yahay in uu yeesho baaritaanka taariikh dembiyeedka oo loogu talagalay hadda la joogo ama boos ama meelayn la filayo.

MAXAA DHACAYA HADDII AANAN HELIN EMAIL SI AAN U SAMEEYO RA'YI URURINTAYDA OGGOLAANSHAHA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA?

SI waxay heli doontaa email loogu talagalay Oggolaanshaha iyo Bixinta Macluumaad 'Disclosure' kaliya ka dib marka qofka lala xiriirayo ("qualified entity designee" ama QED) uu gudbiyo baaritaanka taariikh dembiyeedka:

1. Xaqiiji in QED-kaagu uu leeyahay cinwaanka email-ka ee saxda ah oo aysan jirin qaladaad dhanka xogta ah; xaqiiji in QED uu gudbiyay codsiga.
2. Fiiri email-kaaga spam-ka/email-ka aan la rabin 'junk'. Email-ka waxaa soo diray "bcu.orchards@odhsoha.oregon.gov."
3. Haddii loo baahdo, waxaad si toos ah u geli kartaa nidaamka oggolaanshaha iyo bixinta macluumaadka email la'aan. Lambarka codsigaaga ka codso QED oo booqo website-ka Bixinta Macluumaadka ee Codsadaha: https://www.orchardsbcu.com/Public/ApplicantDisclosure.

MAXAY TAHAY IN AAN SAMEEYO NIDAAMKA OGGOLAANSHAHA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA EE INTERNET-KA HADDII FARRIIN QALAD AH SOO BAXDO: "AAN LA HELIN WAX ISKU DHIGMA"?

Tani waa su'aasha ugu badan ee CBU hesho. Halkan waxaa ku qoran fikradaha qaarkood:

1. Magaca u dambeeyaa waa in uu ahaadaa mid la mid ah sida uu u geliyo qofka lala xiriirayo 'local contact' ama ("qualified entity designee" ama QED) halka aad ka codsanayso ama ka helayso dib u hubinta 'recheck' – oo aanan lahayn meelo bannaan oo dhaxeeya ama xarfo/kalmado/astaamo 'characters'
2. Higaada magaca dambe la xaqiiji QED. Waa in ay noqotaa mid si sax u ah u waafaqsan sawirkaaga aqoonsi ee dowladda ee aad siisay QED.
3. Haddii aad leedahay laba magac oo dambe– isku day magac leh xariijin iyo mid aysan xariijin u dhaxayn (tusaale, Smith-Jones; haddii taasi shaqeyn waydo, isku day SmithJones).
4. Hubi in aadan u dhaxaysiin meelo bannaan oo dheeraad ah ka hor ama ka dib Lambarka Codsiga ama Magaca Dambe.
5. Soo dir sawirka muuqaalka shaashada 'screenshot' ee farriinta qaladka ah iyo sida lambarka codsiga, magaca dambe iyo taariikhda dhalashada loogu muujiyay shaashada bixinta macluumaadka ee fariinta qaladka ah
6. Email u dir bcu.orchards@odhsoha.oregon.gov wixii qalad ah, Waanu sii baari karnaa.

WAA MAXAY NIDAAMKA INTERNET-KA 'BROWSER' EE AY TAHAY IN LA ISTICMAALO?

1. MS Edge waa nidaamka internet-ka 'browser' ee lagu taliyay.
2. Internet Explorer ma aha mid la socon kara ORCHARDS – ha isticmaalin.
3. Nidaamyada kale ee internet-ka 'browser' jawaab kama bixiyaan soo dejinta dokumentiyada ama shaqooyinka kale.
4. Email u dir bcu.orchards@odhsoha.oregon.gov haddii ay dhibaatooyin ku sii haystaan.

MAXAA DHACAYA HADDII SHAASHADU FARIISATO OO HORE U SOCON WEYDO?

Tani waxay ka dhaci kartaa boggaga bixinta macluumaadka. Waxaa dhici karta in aad macluumaad badan gelisay sanduuqa qoraalka ee bixinta macluumaadka:

1. Halkii aad ka isticmaali lahayd sanduuqa qoraalka ee bixinta macluumaadka ee loogu talagalay macluumaadkaaga, ku qor: "info emailed to BCU.Info"
2. Macluumaad u dir bcu.orchards@odhsoha.oregon.gov. Ku qor macluumaadkaaga email-ka dhexdiisa ama ku soo lifaaq oo noo soo dir wixii dokumentiyo oo aad jeclaan lahayd in aanu dib u eegno.
3. Marka aad email-ka u soo dirto bcu.orchards@odhsoha.oregon.gov, fadlan soo raaci magacaaga iyo lambarka codsiga lagu siiyay.

WAA MAXAY DIB U HUBINTU "RECHECKS"

Dib u hubintu waa dib u cusbooneysiinta baaritaanka taariikh dembiyeedka ee loogu talagalay SI isla haddaba haysta oggolaanshaha baaritaanka taariikh dembiyeedka. Si aad meel fiican u taagnaato, baaritaanka taariikh dembiyeedkaaga waxaa loo baahan yahay in dib loo sameeyo, sida caadiga ah 2 ama 3 sano ee kasta, iyada oo ku xiran shaqadaada. BCU ayaa la xiriirta dhammaan cidda aad u shaqeyso/dadka lala xiriirayo marka aad u baahan tahay dib u cusbooneysiin. Inta lagu jiro nidaamka dib u hubinta, waxaa dhici karta in lagaa codsado in aad sameyso ra'yi ururinta oggolaanshaha iyo bixin macluumaadka oo badan ilaa laga qabanayo hawsha baaritaanka taariikh dembiyeedka.

Waqtiga ugu horreeya ee dib u hubintu bilaabmi kartaa waa 120 maalmood ka hor taariikhda uu dhacayo baaritaanka taariikh dembiyeedku. Marka hal baaritaanka taariikh dembiyeedka dib loo oggolaado, dhammaan baaritaannada taariikh dembiyeedka mustaqbalka ayaa la oggolaan karaa iyaga oo ah mid Dabacsan (uma baahnaan doontid in aad sameyso oggolaansho iyo bixin macluumaad oo dheeraad ah).

BACKGROUND CHECK UNIT

Office of Human Resources Shared Services

Serving the Department of Human Services and the Oregon Health Authority

P.O. Box 14870
Salem, OR 97309-5066

Codka: (503) 378-5470 ama khadka bilaashka ah (888) 272-5545
Fax-ka: (503) 378-6314

http://www.oregon.gov/DHS/BUSINESS-SERVICES/CHC/Pages/index.aspx

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Kooxda Baaritaanka Taariikh Dembiyeedka kala xiriir 503-378-5470 ama email u dir bcu.info@dhsoha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

DHS 4277 (7/2022) Somali